



## XAFIISKA QARAMADA MIDOOBAY U QAABILSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Faafin Degdeg ah

### WAR SAXAAFADEED 26/2014

#### **Ergeyga Qaramada Midoobay ee Soomaaliya oo cambaareeyay dil loo geystay wariye**

**Muqadisho, 21 June 2014** – Ergeyga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u qaabilsan Soomaaliya, Nicholas Kay, ayaa cambaareeyay dil saaka loogu geystay magaalada Muqdisho Yuusuf Keynaan oo ahaa wariye ka shaqeeya idaacada magaalada.

Md. Keynaan, oo markii la dilay u shaqeynayay Idaacadda Mustaqbal iyo Idaacadda Ergo, ayaa dhintay markuu qaraxday bamboo loogu xiray gaarigiisa oo yaallay degmada Xamarweyne ee magaalada Muqdisho.

“Waxaan cambaareynayaa dilka loo geystay mid kale oo ah wariye Soomaaliyeed oo dhallinyara ah oo karti leh, waxaana ugu baaqayaa Dowladda Federaalka Soomaaliya inay tallaabo degdeg ah ka qaaddo si ay dilkan baaris ugu sameyso, kuwii geystayna caddaaladda hor keento,” ayuu yiri Ergeyga Gaarka ah Nicholas Kay.

“Waxaa lagama maarmaan ah in shaqaalaha warbaahintu ay awood u helaan inay hawshooda muhimka ah ku gutaan jawi aamin ah oo bad qaba,” ayuu raaciyay.

Md. Kay wuxuu tacsii tiiraanyo leh u diray saaxiibada iyo qoyska uu ka geeriyooday marxuumka Md. Keynaan, iyo weliba bahda saxaafadda Soomaaliyeed.